## Adeegyada Tignoolajiyada Caawinta waxaa laga heli karaa Barnaamijyada kharashaad Ka-dhaafidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada ee soo socda:

**Heerka Daryeelka Xarunta Daryeelka Dhexe**

- Kharash ka-dhaafida taageerada qoysaska (FSW)
- Kharash ka-dhaafida loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba naafo horumarineed, maalinta adeegyada
- Kharash ka-dhaafid dhammaystiran oo loogu talagalay dadka qaba naafonimada horumarineed

**Heerka Daryeelka ee Xarunta Kalkaalisada**

- Ka-dhaafidda Dhaawaca Maskaxda (TBI)
- Kharash ka-dhaafidda HCBS ee Waayeelka, Dadka Waaweyn, iyo Carruurta Naafada ah



Macluumaadka Tignoolajiyada Caawinta waxa laga helaa Xeerarka Maamulka ee Nebrask:

- Cinwaanka 403 NAC Cutubyada 4, 5, iyo 6
- Cinwaanka 480 NAC Cutubyada 5 iyo 6

**Wixii macluumaad dheeraad ah booqo:**
**https://dhhs.ne.gov/**

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Nebraska
Qaybta Naafada Korriinka

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.
DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

# Adeegyada Tignoolajiyada Caawinta (AT)




DD-PAM-8 7/2025

*Caawinta dadka inay ku noolaadaan nolol wanaagsan*

# Waa maxay Tignoolajiyada Caawinta (AT)?

Tignoolajiyada Caawinta (AT) waa qalab iyo agab khaas ah oo hubiya in baahiyaha caafimaad, daryeel, iyo badbaado ee ka-qaybgalaha la daboolo,
isla markaana awood u siiya ka-qaybgalaha inuu kordhiyo, ilaaliyo, ama horumariyo awoodihiisa shaqo.




## Faa'iidooyinka Tignoolajiyada Caawinta

- Kordhisa madaxbannaanida iyo isku-filnaanta.
- Waxay hagaajisaa isgaarsiinta iyo fursadaha waxbarasho.
- Kordhisa helitaanka goobaha shaqada, iskuullada, iyo guryaha si loo fududeeyo hawlaha dhaqdhaqaaqa.
- Waxay kordhisaa kalsooni iyo tayada nolosha.





## Yaa ka faa'iidaysan kara?

- **Dadka** qaba**naafo jireed, mid darayneed, ama curyaanimo**maskaxeed
- **Waayeelka** la kulma **caqabado dhaqdhaqaaq ama caqabadaha** caafimaad
- **Ardayda** u baahan **taageero waxbarasho**

## Helitaanka iyo Maalgelinta Tignoolajiyada Caawinta

Qiimeyn ayaa la dhammeystiraa waxaana ka mid ah dib-u-eegis xaaladaha naafonimada, xirfadaha shaqo, iyo xaddidaadaha.

- **Xarumaha Daryeelka Caafimaadka iyo Soo-kabashada:** la tasho daaweeyayaasha shaqada, jirka, ama hadalka si aad u hesho talooyin.
- **Iskuullada:** Barnaamijyada waxbarashada gaarka ah waxay taageero siiyaan dadka da'doodu u dhaxayso 0–21 sano.

## Noocyada Tignoolajiyada Caawinta

1. **Qalabka Dhaqdhaqaaqa**
   - Kuraasta curyaamiinta (kuwa gacanta lagu kaxeeyo iyo kuwo korontada leh)
   - Aaladaha socodka iyo ulaha caawinta
   - Wiishka caawinta fuulista jaaranjarada
2. **Qalabka Isgaarsiinta**
   - Qalabka soo saara hadalka
   - Agabka Isgaarsiinta Kale iyo Taageerada (AAC)
   - Software-ka qoraalka hadal u beddela iyo barnaamijyada aqoonsiga codka
3. **Qalabka Maqalka iyo Aragtida**
   - Software akhrinaya shaashadda iyo barnaamijyada weyneeya muuqaalka
   - Aaladaha Braille iyo qalabka qoraalka qora
4. **Qalabka Waxbarashada iyo Garashada**
   - Software qoraalka hadal u beddela
   - Kiiboodhka la qabsiga iyo qalabka lagu xakameeyo codka
5. **Qalabka Nolol Maalinle**
   - Tignoolajiyada guriga ku xiran ee otomaatiga u shidma (nalalka codka lagu kiciyo, kuleyliyaha iyo qaboojiyaha)
   - Agabka jikada ee curyaamada iyo qalabka cuntada
   - Xusuusiyeyaasha daawooyinka